



Somali

BUFFALO PUBLIC SCHOOLS

Office of the Superintendent

65 Niagara Square Room #712 City Hall

Buffalo, New York 14202

Phone (716) 816-3575 * Fax (716) 851-3033

krinercash@buffaloschools.org

Abriil 8, 2019

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Buffalo:

Annaga iyo dhamaan xubnaha Guddiga Waxbarashada Buffalo waxaan muujinaynaa murugadeenna qotada dheer iyo dhacdada naxdinta leh iyo rabshadaha macquul galka aheyn ee sheeganaya nolosha carruur badan ee bulshadeena. Maalinti Sabtida fiidkii, waxaan luminay ilmo kale oo qurux badan, oo mustaqbal buuxa oo rajo leh ku haminayey, rabshado aan micno ku fadhin oo loo adeegsado qoryo ee marar badan ka dhaca xaafadaha Buffalo. Qaar badan oo ka mid ah carruurtayada qaaliga ah ayaa ah kuwo ku dhaawacma ama naftooda ku gablanto sababo la xiriira rabshadaha hubka loo adeegsado. Iyadoo aan diiradda saareyno qalinjabintooda iyo mustaqbalkooda ifaya, had iyo jeer waa wax laga naxo oo aan la qiyaasi karin marka ilmo qaabkaan ku weeyno.

Madaxwaynaha Guddiga Waxbarashada Buffalo, Margaret Nevergold iyo aniga waxaan ugu baaqaynaa hay'adaheena diiniga ah, ururada muwaadiniinta, waalidiinteen, Duqa Magaalada iyo saraakiisha la soo doorto, iyo dugsiyadeena - dhammaanteena in aan ka wada shaqeeyeyno si kor loogu qaado nabadda loona qaado tallaabooyin cad oo lagu joojinayo rabshadaha HADDA!

Waxaanu barnaa ardaydeena inay qaataan xal nabadeed oo nabadgelyo ah iyada oo loo marayo Hagaajinta Dhaqanka. Waxaanu siinnaa Wacya-gelin Daryeel Xagga Shooga. Waxaanu ku tababarnaa shaqaalaha in ay ku dhaqmaan wax baridda ku saleysan jawaabcelinta dhaqamada iyo luqadaha, waxaan si taxadar leh u diyaarinnaa Kooxaha Adeegyada Dhibaatooyinka deg-dega ah. Kooxda Adeegga Dhibaataada deg-dega ah iyo Kooxaha Taageerada Ardayga ee Dugsiga ku saleysan waxay ku biiri doonaan dhowr ka mid ah shuraakadayada bulshadeena si ay u bixiyaan talooyin iyo adeeyo taageero loo fidinayo Dugsiga Caalamiga # 45, Dugsiga Sare ee Lafayette International High School # 207, Akadamiyadda Newcomer ee Lafayette # 353, Dugsiga Montessori # 32, iyo Dugsiga Farsamada Hutchinson # 304. Waxaan marwalba diyaar u nahay inaan caawinno caruurteena iyo qoysaskeena waqtiga loo baahan yahay. Si kastaba ha ahaatee, ducadeena ugu weyni waa in aanu aragno maalin aan fogeyn ee loo baahneyn daaweyn shoog dambe ee la xiriira nolosha dhalanyaradeena.

Fadlan ku hagaaji maskax ku heyntaada ruuxiga ah iyo ficilo daacadnimo Badraldeen Elwaseem, kaas oo qoyskiisa ka tagay. Qoyskiisa murugeysan iyo magaalada oo dhan oo la barooraneysa dhimashadiisa degdega ee niyad-jabka leh, sidii mid kasta oo ka mid ah kuwa kale, midkastana aan si buuxda u fahmi doonin.

Dr. Kriner Cash
Superintendent

Dr. Barbara Nevergold
Board President

"Putting Children & Families First to Ensure High Academic Achievement for All"